

WAX KU BARASHADA GURIGA: WARBIXIN KU SOCOTA WAALIDIINTA IYO DARYEELAYAASHA DHALAANKA

Talo, tusaale iyo Agabyo lagu taageeraayo dhalaanka inta ay guryaha wax ku baranayaan.

WAX BARASHADA LAGU QAATO GURIGA

Waxa ugu muhiimsan ee aad ku caawin karto caruurta waxbarashada ku qaata guriga waa in aad joogtayso xiliga ay wax bartaan, taageero iyo dhiirigelin. Cidina kaa filimayso in aad noqoto macalin, ama khabiir yaqaan maadooyink iskuulada lagu barto.

Waxaa se muhiim ah in aad xidhiidh joogto ah la leedahay iskuulka caruurtaadu wax ku barato.

Iskuulka caruurtaadu wax ku bartaan wuxuu kuugu deeqi karaa:

- In uu si cad kuugu sharxo masuuliyada macalimiinta caruurtaada wax barta iyo waxa looga baahan yahay in waalidiinta, daryeelayaasha caruurta iyo caruutuba qabtaan.
- In uu soo gaarsiiyo caruurta mowduucyaddii ay baran lahaayeen.
- In uu war baahinta iskuulka kula sameeyo wada hadal joogto ah waalidiinta iyo ardayda, sida website-ka, joornaalada iyo email ka iskuulka.
- In uu kala taliyo waalidiinta iyo ardayda agabka internetka ee ay ardaydu isticmaali karaan si looga taageero wax barashada ay ku qaadanayaan guriga.

Haddii aan guriga computer kuu oolin ama aadan lahayn internet, waxa kula soo xiriiraya iskuulkaaga si aad uga wada hadashaan in canugaagu u baahan yahay in uu iskuulka ka amaahdo computer iyo sidii loo soo gaarsiin lahaa duruusta uu barto.

SIDA LOO SAMEEYO GOOB WAXBARASHO

Guryaha oo dhami way kala duwan yihiin. Haddii ay suurta gal tahay, goobta waxbarashada waa inay tahay meel qoysku wadaago. Tusaale ahaan qolka fadhiga ama qolka cuntada. Goobahani way ka wanaagsan yihiin qolalka hurdada oo laga yaabo in caruurta ay ku cidloodaan ama ay adag tahay in la kormeero waxbarashadooda.

Goobta waxbarasho waa in ay tahay:

- Goob shanqar yar marmarka qaar
- Meel adiga ama qof kale oo waayeel ihi joogo.

1 [Learning from home: Information for parents and carers - Somali](#)

MASUULIYADA ARDAYDA WAX KU BARANAYSA MEELO KA BAXSAN ISKOOLADA

Iyadoo ay ku xidhan tahay da'da iyo heerka ay ka marayaan waxbarashada iskuulka, waxaa looga baahan yahay in ay ardaydu sameeyaan:

- In ay kala socdaan ogeysiiska iyo jawaab celinta macalimiinta isgaarsiinta casriga ah sida website ka iskuulka iyo emailka.
- In ay isku taxalujiyaan sidii ay uga bogan lahaayeen howlaha waxbarasho ee loo diro.
- In ay isku taxalujiyaan in ay ku dhameeyeen howlaha waxbarasho wakhtigii loo cayimay.
- In ay si furan ula hadlaan macalimiintooda una soo bandhigaan wixii su'aalo ah ee ay qabaan.
- In ay raacaan habdhqanka quman ee lagu baray iskuulka.

IN AY JOOGTO KA DHIGAAN WAKHTIGA WAXBARASHADA IYO RAJADADA WAXBARASHO EE LAGA FILAYO ARDAYDA

Waa muhiim in aad u dejiso wakhti waxbarasho oo joogto ah si aad u taageerto canugaaga inta uu ku qaadanayo waxbashadiisa guriga. Waxay arintani fursad u siinaysaa canugaagu in uu helo goob ku haboon oo ku dhiirigelisa waxbarashada.

U samee wakhti uu bilaabo iyo wakhti uu dhameeyo waxbarashada canugaaga kormeerna si'aad uga caawiso waxbarashada.

- Ka baaraandeg oo faham awaamiirta waxbarasho ee ay siiyaan macalimiintu ardayda
- Ka caawi tabaabushaha waxbarasho iyo sidii ay u kala hormarin lahaayeen howl maalmeedka waxbarasho inta ay wax ku baranayaan guriga.

Ku dhiiri geli cayaaraha iyo jimicsiga wakhtiyada biririfta ama nasashada. Badanaa iskuulada ayaa idin kala talinaya cayaaraha iyo jimicsiyada ku haboon ardayda.

Ku dhiirigeli in ay caadaystaan cunida cunto wanaagsan hubina in ay cabaan biyo ku filan.

Iskuday in aad joogtayso wakhtiga ay seexdaan gaar ahaan caruurta yaryar.

MAARAYNTA AMAANKA ISTICMAALKA INTERNETKA IYO WAKHTIGA DAAWASHADA TELEFISHANKA

Mar haddii ay u badan tahay in ay wakhti ku qaataan caruurta isticmaalka internetka waxaa haboon in aad kala hadasho sidii ay si amaana u isticmaali lahaayeen internetka. Tani waxay ka caawinaysaa in kala doortaan isticmaalka internetka ee ku haboon iyo in ay si masuuliyadi ku jirto uga faa'iidaystaan xogaha iyo adeega isgaarsiineed ee internetka.

Waxaad kala hadli kartaa canugaaga arimahan:

- In ay isticmaalaan keliya agabka internetka ee iskuul koodu kula taliyay in ay isticmaalaan ama ay kula Talisay Wasaarada Waxbarashadu.
- In ay ixtiraam kuna dhaqmaan markay isticmaalyaan internetka sida ay ixtiraam ugu dhaqmaan marka ay la hadlayaan qof hortaagan.

1 [Learning from home: Information for parents and carers - Somali](#)

- In ay ku isticmaalaan internetka meel guriga ka mida oo laga arkayo sida fadhiga ama qolka cuntada.

Wixii xog dheeraada ee ay rabaan waalidiinta iyo daryeelayaasha dhalaanku ee ku saabsan amaanka isticmaalka internet booqo www.esafety.gov.au

DHOWRIDA DURUUFTA CAAFIMAADKA MASKAXDA IYO CAAFIMAADKA GUUD

Waa muhiim in aad wakhti geliso maalin walba si aad u ogaato duruufta caafimaadka maskaxeed iyo mida jirka ee caruurtaada.

Waxay qaadan kartaa wakhti in uu canugaagu la qabsado isbedelka waxbarasho ee cusub sida, in uu arkiwaayo saaxibadiisa uu wax labaranjiray. Canug waliba si ka duwan sida caruurta kale ayuu u dareemayaa duruufaha cusub, dareen murugo, xanaaq, baqdin iyo caro badan in aad ku aragtaa waa caadi.

Waad caawin kartaa caruurtaada adigoo:

- Siinaya fursad ay kaagala hadlaan dareenkooda adna aad dhegaysato waxay ka hadlayaan.
- In aad ogaato waxyaalaha ay iskood u qabsan karaan iyo in aad kala hadasho wixii ay tabanayaan
- Waydii dereenkooda ku saabsan waxbarashada iskuulka debadiisa ay ku qaadanayaan iyo wixii ay rabaan in aad ka caawiso.

Haddii aad ka qabto wax werwer ah caafimaadka canugaaga fadlan laxiriir iskuulkiisa si laguu caawiyo.

TALOoyIN DHEERAAD AH OO LOO JEEDINAYO WAALIDIINTA IYO DARYEELAYAASHA CARUURTA

Haddii canugaagu leeyahay baahiyo dheeraad ah, waa in aad kala hadashaa macalinkiiisa qorshe waxbarasho oo u gaar ah canuga. Tani waxay ka caawinaysaa in uu guriga si ku haboon wax ugu barto.

Boga waalidiinta ee wasaarada waxbarashada (www.education.vic.gov.au/parents) waxaad ka heli kartaa xog dheeraada oo ku qoran afka ingiriisiga looguna talo galay in ay ka caawiso waalidiinta iyo daryeelayaasha caruurta in ay ka taageeraan caruurta waxbarashada guriga.

Waxaa kele oo aad ka heli kartaa diiwaan tafotiran oo ingiriisi ku qoran oo lagu magacaabo *understanding learning difficulties for parents*: Nuqul ka mida waxaa ku jira talooyin xaqiiqo ah oo ku saabsan caqabadaha waxbarashada iyo tax Apps ah oo xambaarsan soo jeedin talooyin khaas ah. Waxaanad ka heli kartaa www.uldforparents.com

TALOoyINKA IYO MACLUUMAADKA WAX AKHRISKA IYO XISAABTA

Buugaagta iyo macluumaadka iskuulku ugu deeqo ardayda waxa soo raaca in aad isticmaasho macluumaadkan kale ee hoos ku qoran, si aad ugu caawiso caruurta waxbarashada guriga. Waa kuwan macluumaadku iyagoo ingiriisi kuligood ku qoran.

Akhriska iyo xisaabta:

- 1 [Learning from home: Information for parents and carers - Somali](#)

Talooyinka waalidiinta iyo daryeelayaasha caruurta si ay kor ugu qaadaan xirfada wax akhris iyo xisaabta ardayda waxaa laga heli karaa www.education.vic.gov.au search: get involved in literacy and numeracy

Bilowga carbiska akhriska

Carbiskani wuxuu caruurta iyo ardayda ku dhiirigeliyaa laga bilaabo marka ay dhashaan ilaa marka ay 10 jir gaaraan in ay akhriyaan tiro buugaag ah dadaalkooda wax akhrisna ay ku qoraan internetka. Iska diiwaan geli www.education.vic.gov.au search *premiers' reading challenge*

Barashada guriga ee xisaabta iyo tirada

Waalidiinta iyo daryeelayaasha caruurta waxay door muhiima ka qaataan horumarinta xirfada xisaabta iyo tirada ee caruurta. Talooyin iyo macluumaad loogu talagalay qoysaska waxaad ka heli kartaa www.education.vic.gov.au search: *mathematics and numeracy at home*

© State of Victoria (Department of Education and Training) 2020. Except where otherwise noted, material in this document is provided under a [Creative Commons Attribution 4.0 International](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/) Please check the full [copyright notice](#)